

Isbeddellada ku saabsan barnaamijka dowladda ma ahan kuwo islamarkiiba dhaqangelaaya, waa qorshe oo keliya – Macluumaadkii ugu dambeeyay waxaad marwalba ka heleysaa boggeenna internetka

Waxaa haatan na soo gaara su'aalo badan oo la xiriira barnaamijka dowladda. Barnaamijka dowladda waa qorshe siyaasdeed, kaasoo la iskula meeldhigo ahdaafta ay dowladdu tiigsanayso iyo shaqooyinka ugu muhiimsan ee dowladda u yaalla. Arrimaha suuraggalka ay tahay in uu isbeddel ku dhaco ma ahan kuwo islamarkiiba dhaqangelaaya, diyaarintooda ayaa waqti qaadanaysa. Wali lama hayo wax macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan jadwalka ama taariikhda ay isbeddelladaasi dhacayaan.

Hoggaanka socdaalku ma diyaariyo wax sharciyo ku saabsan, go'aanna kama gaaro dhaqangalka sharciyada. Baarlamaanka dalkaan Finland ayaa go'aan ka gaara arrimaha ku saabsan sharciyada.

Wax isbeddello ah oo weli dhacay ma jiraan. Weli annagu ma haynno wax macluumaad ah oo ku saabsan, saamaynta ay isbeddelladaasi ku yeelanayaan codsiyada hore loo direy iyo kuwa cusub. Annaga ayaa adiga kula soo xiriireynna, haddii isbeddelladaas ay khuseeyaan codsigaaga.

Waan fahmaynaa in isbeddelladaas suuraggalka ah ay keenayaan su'aalo iyo xaalad hubanti la'aan ah. Waxaan idiin sheegi doonaa isbeddelladaas suuraggalka ah, markii aan helno macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan isbeddelladaas. Macluumaadkii ugu dambeeyay waxaad marwalba kala socon kartaan boggeenna internetka ee cinwaankiisu yahay: migri.fi.

Wasaaraduhu waxaa ay fuliyaan barnaamijka dowladda, waxaa ay diyaariyaan sharciyada, hore ayayna u sii gudbiyaan si loo cusboonaysiiyo. Haddii aad doonayso inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cusboonaysiinta, waxaad kala socon kartaa bogga internetka ee golaha dowladda ee diyaarinta sharciyada iyo mashaariicda horumarineed [säädosvalmistelua ja kehittämishankkeita valtioneuvoston verkkosivuilla \(valtioneuvosto.fi\)](http://säädosvalmistelua.ja.kehittämishankkeita.valtioneuvoston.verkkosivuilla.valtioneuvosto.fi) (waxaa ay ku qoran yihiin luqadaha af-finishka iyo af-iswidhishka oo keliya). Hoggaanka socdaalku wuxuu ku shaqeeysaa tilmaanbixinnada ama hagista ay siiyaan wasaaradda arrimaha gudaha iyo wasaaradda shaqada iyo meheradaha.